

Aanu isla qorshayna: Miisaaniyadda 2024

Noofambar 27, 2023 [Weydiimaha saxaafadda](#)

Dadka reer Alberta waxaa lagu casuumayaa inay aragtiyadooda nala wadaagaan maadaama dowladdu diyaarinayso Miisaaniyaddii 2024.

Aragtida reer Alberta waxay qayb muhiim ah ka tahay hanaanka maaliyadda waxayna gacan ka gaysanaysaa diyaarinta waxyaabaha hor-utabinta u leh dhaqaalaha gobolka. Miisaaniyadda 2024 waxay sii balaarinaysaa dadaalka ay dowladdu ugu jirto isu dheelitirka miisaaniyadda, waxay wax ka taraysaa cadaadiska koboca, sidii nolosha looga dhigi lahaa mid jaban loona hagaajin lahaa dadka reer Alberta.

Dadka reer Alberta waxaa lagu dhiirgalinayaa inay soo buuxiyaan xog aruurinta onleenka ah ee Miisaaniyadda 2024 kuna soo biiraan khadka teleefoonka ee xarumaha magaalada ay ku qabanayo Nate Horner oo ah Madaxweynaha Guddiga Khadnajiga iyo Wasiirka Maaliyadda. Ganacsiyada, dowladaha hoose, ururada warshadaha, ururada bulshada iyo ururada kaleba waxay miisaaniyadda ay soo gudbinayaan noogu soo diri karaan barteenna onleenka ah ayaka oo matalaya ka ah ururkooda si onleen ah.

“Miisaaniyadda 2024 waa fursad lagu sii wadayo dhisidda dhaqaale adkaysi leh, xoojinta adeegyada dadka reer Alberta ay helaan, soojiidashada maalgalin dheeraad ah iyo abuurista shaqooyinka. Ka qaybgalkaagu wuxuu muhiim u yahay go'aaminta sidii aan dhaqaalaheena u hormarin lahayn si qof kasta oo reer Alberta ah uu uga faa'iidaysto barwaaqada iyo maaraynta dhaqaalaha ee masuuliyadda leh. Waxaan kaa sugayaa inaan kaa maqlo waxa adiga iyo bulshadaada muhiimka u ah ee Miisaaniyadda 2024.”

Travis Toews, Gudoomiyaha Guddiga Khasnada iyo Wasiirka Maaliyadda

Dhegaysigu wuxuu muhiim u yahay hanaanka miisaaniyadda, ayada oo adeegsanaysa la tashiga bulshada ee dadka reer Alberta, hogaamiyeyaasha iyo kooxaha bulshada, dowladdu waxay dhisi kartaa mustaqbal xooggan oo barwaaqo ah.

Barta xog aruurinta ee onleenka ah waa ay furantahay Janaayo. 19, 2024. Hoolasha teleefoonka magaalada waxaa la qaban doonaa Diisambar 11 iyo Diisambar 12. Si ay uga qaybqaataan, dadka reer Alberta waxay isku diiwaangalin karaan si onleen ah.

Xaqiiqooyinka kooban

- Sannadkii lasoo dhaafay, 23,780 oo dadka reer Alberta ah ayaa buuxiyay xog aruurinta onleenka ah ee Miisaaniyadda 2023 ku dhawaad 25,000 dadka reer Alberta ahna waxay ka qaybqaateen wicitaanadda xarunta teleefoonka magaalada.
- Dadka reer Alberta waxay aragtidooda ka dhiibteen mowduucyada muhiimka ah oo ay kujiraan daryeelka caafimaadka, maciishadda nololaha iyo sicir bararka.
- Waxaa dowladda soo gaaray ilaa 159 aragti oo laga soo gudbiyay miisaaniyadda: 140 waxyaabaha lasoo gudbiyay waxay ka yimaadeen saaxiibada, sida ururada dhaqaalaha iyo ururada bulshada, ayadoo 19 ka yimaadeen shakhsiyaad reer Alberta ah.
- Miisaaniyadda reer Alberta waa in lasii daayaa kahor dhammaadka Febraayo sannad walba.

Macluumaad la xidhiidha

- [Bogga weybsaytka talo bixinta miisaaniyadda](#)

Su'aalaha warbaahinta

Savannah Johannsen

780-686-3521

Xoghayaha Warfaafinta, Guddiga Khasnajiga iyo Maaliyadda